

THIS FORM MUST BE COMPLETED IN ENGLISH
(FOOMKAAN WAA IN LAGU BUUXIYO INGIRIISI.)

**FORM 11 - PETITION TO PROCEED PRO SE COUNSEL
FOOMKA 11 - CODSIGA IN QOFKA NAFTIISA DAAFACA**

STATE OF MINNESOTA
GOBOLAKA MINNESOTA
COUNTY OF _____
DAGMADA

DISTRICT COURT
MAXKAMADDA DAGMADA
_____ JUDICIAL DISTRICT
MAXKAMADDA GOBOLKA

State of Minnesota,
Gobolka Minnesota

Plaintiff,
Dacwoodaha,

PETITION TO PROCEED
AS PRO SE COUNSEL
CODSIGA QOFKA
NAFTIISA DAAFACA

vs.

District Court File No. _____
Maxkamadda Dagmada Fayl No.

_____,
Defendant.
Eedeysanaha.

TO: THE ABOVE-NAMED COURT
KU SOCOTA: MAXKAMADDA KOR LAGU MAGACAABAY

I, _____, defendant in the above-entitled action,
request the Court to allow me to represent myself, and do respectfully represent
and state as follows:

Aniga, _____, eedeysanaha dacwadda kor lagu
magacaabay, waxaan Maxkamadda ka codsanaa in ay ii ogolaato in aan mattalo
nafteyda, iyo waxaan si xushmad leh u soo jeedinaa una sheegaa sida soo socoto:

THIS FORM MUST BE COMPLETED IN ENGLISH
(FOOMKAAN WAA IN LAGU BUUXIYO INGIRIISI.)

1. My full name is _____. I am _____ years old.
My date of birth is _____. The last grade that I went through in
_____ school is _____.

Magaceyga oo buuxa waa _____. Aniga
waxaan jiraa _____ sanno. Taariikhda aan dhashay waa _____.
Darajada ugu sareeyso aan ka gaaray dugsigu _____ waa _____.

2. I have received and read the (complaint)(indictment).

Waxaan helay iyo waxaan akhristay (ashtakada) (eedeynta).

3. I understand the charge(s) made against me.

Waxaan fahamsanahay eedeynta (eedaha) ley haysto.

4. Specifically, I understand that I have been charged with the crime(s) of
_____ alleged to have occurred on or about
_____, _____, in _____, County, Minnesota.

Gaar ahaan, Aniga waxaan fahamsanahay in dambiga (dambiyada)
_____ leygay soo eedayay in ay dhaceen marka ay
ahayd ama qiyaas ahaan marka ay ahayd _____, _____, iyo in ay ka
dhaceen Dagmaada _____, Minnesota.

5. I have discussed my desire to represent myself with an attorney whose name
is _____.

Aniga waxaan rabitaankeyga ku saabsan in aan mattalo nafteyda kala hadlay
qareen lagu magacaabo _____.

6. I (have)(have never) been a patient in a mental hospital.

Waxaan (ahaa) (weligey ma noqonin) bukaan gala isbitaalka madaxa.

7. I (have)(have not) talked with or been treated by a psychiatrist or other
person for a nervous or mental condition.

Aniga waan la hadlay (lama hadlin) ama ima daweynin takhtarka madaxa
ama ma jiro qof kale oo iga daweyyay xaalad la xariirta xididdada ama madaxa.

8. I (have)(have not) been ill recently.

Dhawaanahaan (waan xanuunsaday) (ma xanuunsanin).

9. I (have)(have not) recently been taking pills or medicine.

Dhawaanahaan (waxaan qaatay) (ma qaadanin) kaniini ama daawo.

10. I understand that I have an absolute right to have an attorney represent me in these proceedings. I understand that if I am eligible for the services of a public defender, the Court will appoint the Office of the _____ Public Defender to represent me.

Aniga waxaan fahamsanahay in aan dhab ahaan xaq u leeyahay in qareen iga mattalo dacwadahaan. Waxaan fahamsanahay in haddii aan xaq u yeesho adeegyada qareenka difaaca dadweynaha, in Maxkamadda magacaabi doonto Xafiiska _____ Difaaca Dadweynaha in uu i mattalo.

11. I understand that if the Court grants my petition to represent myself, I will be responsible for preparing my case for trial and trying my case. I understand that I will be bound by the same rules as an attorney. I understand that if I fail to do something in a timely manner, or make a mistake because of my unfamiliarity with the law, I will be bound by those decisions and must deal with them myself.

Aniga waxaan fahamsanahay in haddii Maxkamadda ogolaato codsigeysga in aan mattalo nafteyda, in aan mas'uul ka noqon doono diyaarinta kiiskeyga si loo qaado loona dhageysto kiiskeyga. Waxaan fahamsanahay in aan u hoggaansamo isla sharciyada uu u hoggaansan yahay qareenka. Waxaan fahamsanahay in haddii aan ku guul dareysto in aan hawlaha u sameeyo waqtiga ku habboon, ama aan sameeyo qalad maxaa yeelay si wanaagsan uma aqaan sharciga, go'aanadaas waxay noqon doonaan kuwo aan u hoggaansamo, waxayna igu tahay waajib in aan qaato mas'uuliyadda go'aanadaas.

12. I understand the Court will schedule a probable cause hearing, if one has not already been held. At the probable cause hearing, I can make a motion that the complaint or indictment filed against me be dismissed for lack of probable cause. That the preparation for, conduct of, and decisions made relating to that hearing will be my sole responsibility.

Aniga waxaan fahamsanahay in Maxkamadda qaban doonto dhageysiga sababta suurtoqalka ah, haddii aan horay loo qabanin mid. Marka la qabanaayo dhageysiga sababta suurtoqal ah, waxaan soo jeedin karaa codsi in ashtakada ama eedeeynta ley haysto la buriyo taasoo ugu wacan in aysan jirin sabab suurtoqal ah. In isu diyaarinta, fullinta, iyo go'aanada la sameeyo ee la xariira dhageysigaas ahaan doonto mas'uuliyada keligey i saaran.

13. I understand that:

Waan fahamsanahay in:

a. the prosecution for their case against me may have:

kiiskooda in ay dhici karto in xeer ilaalinta haysato.

i. physical evidence obtained as a result of searching for and seizing evidence.

caddeyn laga helay baarista iyo la wareegidda caddeynta.

ii. evidence in the form of statements, oral or written, that I made to the police or others regarding the charges;

caddeyn sida oraahyda, afka laga sheego ama qoran, oo aan siiyay boliiska ama dad kale kuna saabsan eedeeynta;

iii. evidence discovered as a result of my statements or as a result of the evidence seized in a search.

caddeyn laga helay wararkeyga ama laga helay caddeynta lala wareegay waqtiga baarista.

iv. identification evidence from a line-up or photographic identification.

caddeyn ku saabsan aqoonsiga laga soo saaro saf ama aqoonsiga sawirka.

v. evidence the prosecution believes indicates that I committed one or more other crimes.

caddeyn xeer ilaaliyaha aaminsan yahay oo tilmaanta in aan geystay mid ama ka badan dambiyo kale.

b. That I have the right to a pretrial hearing before a judge to determine whether or not the evidence the prosecution has could be used against me at trial in this case.

In aan xaq u leeyahay dhageysiga ka horeeyo dacwadda la hor geeyo garsooraha si go'aan looga gaaro haddii caddeynta xeer ilaaliyaha haysto loo isticmaali karo sida caddeyn iga soo horjeeda waqtiga la dhageysto dacwadda kiiskan ama haddii kale.

THIS FORM MUST BE COMPLETED IN ENGLISH
(FOOMKAAAN WAA IN LAGU BUUXIYO INGIRIISI.)

c. That I can testify at the hearing if I want to, but my testimony could not be used as substantive evidence against me if I went to trial and could only be used against me if I was charged with the crime of perjury. (Perjury means testifying falsely.)

In aan ka marqaati furi karo dhageysiga haddii aan doono, hase ahatee marqaati furkeyga looma isticmaali karo sida caddeyn jirta oo iga soo horjeeda haddii loo gudbo in la dhageysto dacwadeyda, waxaana loo isticmaaali karaa oo keliya in leygaga hor yimaado haddii leygu soo eedeeyo dambiga been abuurka. (Macnaha been abuurka waa beenta lagu marqaati furo.)

d. That the preparation for, conduct of, and decisions made relating to that hearing will be my sole responsibility.

In isu diyaarinta, fullinta, iyo go'aanada la sameeyo ee la xariira dhageysigaas ahaan doonto mas'uuliyad keligeed i saaran.

14. I understand that I am entitled to a trial by jury of 12 persons in a felony case and a jury of 6 persons in other cases and all jurors must agree before they can find me guilty. Also, all jurors must agree before they can find me not guilty. I also understand that I may ask for a trial to the judge and not a jury. I further understand that I will conduct all phases of the trial including, but not limited to: writing and filing motions, making arguments to the Court, selection of the jury, cross-examination of the witnesses for the prosecution, direct examination of my witnesses, making all objections, opening statement and closing argument.

Aniga waxaan fahamsanahay in aan xaq u leeyahay in dacwadeyda ay dhageystaan guddi ka kooban 12 qof marka kiisku ku saabsan yahay dambi culus iyo guddi ka kooban 6 qof marka la soo qaado kiisaska kale iyo in dhamaan xubnaha guddiga waajib ku tahay in ay is waafaqaan ka hor inta aysan igu helin in aan geystay dambiga. Sidoo kale, dhamaan xubnaha guddiga waa in ay ku heshiyaan ka hor inta aysan ii arkin in aan geystay eedda. Waxaan kaloo fahamsanahay in ay dhici karto in aan codsado in dacwadeyda uu qaado garsoore baddalkii guddi. Waxaan kalaoo fahamsanahay in aan fullin doono dhamaan maraxaladaha dacwadda kana mid ah, balse ku ekeen: qorista iyo gudbinta codsiyada, doodaha loo jeediyo Maxkamadda, xulashada guddiga, su'aalaha dadban ay xeer ilaalinta weydiiso marqaatiyada, su'aalaha tooska loo weydiyo marqaatiyadeyda, soo jeedinta dhamaan diidmada, wararka furitaanka iyo doodaha xeritaanka.

15. I understand that I am entitled to require any witnesses that I think are favorable to me to appear and testify at my trial by use of a subpoena as approved by the judge.

Aniga waxaan fahamsanahay in aan xaq u leeyaahay in aan dalbado marqaati kasta oo aan u maleeyo in uu ii roon yahay, in uu yimaado, oo ka marqaati furo dacwadeyda, taasoo loo adeegsado ammarka garsooraha ku amro marqaatiga in uu yimaado kana marqaati furo maxkamadda.

16. I understand:

Waxaan fahamsanahay:

a. That a person who has prior convictions or a prior conviction can be given a longer prison term.

In qofka dhowr jeer hore la xakumay ama horay loo siiyay xukun, la siin karo muddo xabsi dheer.

b. That the maximum statutory penalty that the Court could impose for this crime (taking into consideration any prior conviction or convictions) is imprisonment for _____ years, and/or a fine of \$_____. That if a minimum sentence is required by statute the Court may impose a sentence of imprisonment of not less than _____ months for this crime.

In ciqaabta ugu badan sida sharciga qabo ay Maxkamadda dul saari karto dambigaan (kaddib marka la tixgeliyo xukun ama xukumo hore) waa xabsi muddo _____ sanno, iyo/ama ganaax gaara \$_____. In haddii sharciga rabo ciqaabta ugu yar, Maxkamadda waxay dambigaan ka bixin kartaa ciqaabta xabsiga oo aan ka yareyn _____ bil.

17. I understand that if the Court grants my petition to represent myself, the Court may appoint advisory counsel. I understand that if the Court appoints advisory counsel I have the right to consult with advisory counsel in making any decisions regarding the conduct of this case. However, I am under no obligation to seek advice from advisory counsel. I understand that the role of advisory counsel is limited. I understand that:

Aniga waxaan fahamsanahay in haddii Maxkamadda i siiso codsigeyga in aan nafteyda mattalo, Maxkamadda waxay magacaabi kartaa qareenka la-tallinta qofka naftiisa daafaca. Waxaan fahamsanahay in haddii Maxkamadda magacaawdo qareenka la-talliya qofka naftiisa difaaca, in aan xaq u leeyahay in aan la tashto qareenka la-talliyaha si aan u gaaro go'aanada ku saabsan sida

kiisgaan u socdo. Hase ahatee, waajib igama saarna in aan talo ka raadsado la-tallinta qareenka. Waxaan fahamsanahay in kaalinta qareenka la-tallinta kooban tahay. Waxaan fahasmanahay in:

a. Advisory counsel will be physically present in the courtroom during all proceedings in my case.

Qareenka la-tallinta joogi doonaa qolka maxkamadda inta ay socoto dhamaan dacwadda kiiskeyga.

b. Advisory counsel will respond to request for advice from me. Advisory counsel will not initiate such discussions.

Qareenka la-tallinta wuxuu ka jawaabi doonaa codsiyada aan u jeediyo in uu ila talliyo. Qareenka la-tallinta ma bilaabi doono wada hadalada noocaas.

c. The support staff of the advisory counsel - investigators, secretaries, law clerks, and legal service advisors will not be available to me.

Shaqaalaha guddiga la-tallinta - baareyaasha, xogeynta, karaaniga sharciga, iyo la-talliyeyaasha adeegga sharciga ma noqon doonaan kuwo aan helo.

d. If need investigative services, expert services, waivers of fees, research, secretarial services, or any other assistance, I must petition the Court for whatever relief or assistance I deem appropriate. Such request is pursuant to Minnesota Statutes, section 611.21.

Haddii aan u baahdo adeeyga baarista, adeegyada aqoonyaanka, ka dhaafidda khidmadaha, cilmi baarista, adeegyada xogeynta, ama kaalmo kasta oo kale, waa in aan ka codsado Maxkamadda naxariis kasta ama kaalmo kasta oo aan u arko in ay habboon tahay. Codsiga noocaas wuxuu waafaqsan yahay Sharciyada Minnesota, qeybta 611.21.

e. If I am out of custody and desire to conduct legal research, I will be expected to do it myself at the library.

Haddii aan dibadda ka joogo xabsiga oo aan rabo in aan sameeyo cilmi baarista sharciga, waxaa legyga filaa in aan Aniga hawshaas ka sameeyo maktabka.

f. Advisory counsel will not be prepared to try my case on the trial date unless ordered to be prepared to do so by the Court.

Qareenka la-talliyaha diyaar uma ahaan doono qaadidda kiiskeyga taariikhda la qaadi doono dacwadda haddii aysan Maxkamadda ku amrin in uu isu diyaariyo in uu sidaas sameeyo.

g. Advisory counsel will be present for all Court appearances to consult with me if I request. Advisory counsel will be seated either at the back of the courtroom or at counsel table, based on my wishes and the Court's wishes. In an effort to vindicate my constitutional right to self-representation, advisory counsel will not initiate motions, objections, arguments to the Court, or any other aspect of representation unless I have given prior approval to the specific aspect of representation.

Marka la yimaado Maxkamadda, qareenka la-tallinta wuu joogi doonaa Maxkamadda si uu ila tashto haddii aan codsado. Qareenka la-talliyaha qofka naftiisa daafaca wuxuu fadhiisan doonaa dhanka dambe qolka maxkamadda ama miiska qareenada, taasoo ku saleysan rabitaankeyga iyo rabitaanka Maxkamadda. Si aan u soo ceshado xuquuqdeyda dastuuriga in aan nafteyda mattalo, qareenka la-talliyaha qofka naftiisa daafaco ma bilaabi doono codsiyo, diidmo, doodo uu u jeediyo Maxkamadda, ama wiji kale ay leedahay mattalaadda haddii aan horay u siinin ogolaasho la xariirta wijiga u gaarka ah mattalaadda.

h. If I wish to give up my right to represent myself, I know that the Court will not automatically grant my request. The Court will consider the following in either granting or denying that request: the stage of the proceedings, whether advisory counsel is prepared to take over, the length of the continuance necessary for the advisory counsel to assume representation, the prejudice to either party, whether the jury has been sworn, and any other relevant considerations.

Haddii aan rabo in aan ka tanaasulo xaqa aan u leeyahay in aan mattalo nafteyda, waxaan ogsoonahay in Maxkamadda aysan si toos ii siin doonin codsigeyga. Maxkamadda waxay tixgelin doontaa waxa soo socda haddii ay bixineyso ama haddii ay diideyso codsigaas: marxaladda ay mareyso dacwadda, haddii qareenka la-taaliyaha qofka naftiisa difaaca uu diyaar u yahay in uu la wareego, dhererka dib u dhigidda si qareenka la-talliyaha u qaato mattalaadda, saamaynta ay ku yeelan karto dhinacyada, haddii guddiga la dhaariyay, iyo tixgelin kasta oo munaasab ah.

i. If the Court grants my request to give up the right to represent myself and substitute advisory counsel, the trial date may be continued if requested by the advisory counsel. The trial date will then be reset at a date mutually agreeable between counsel for the prosecution and counsel for the defendant.

THIS FORM MUST BE COMPLETED IN ENGLISH
(FOOMKAAN WAA IN LAGU BUUXIYO INGIRIISI.)

Haddii Maxkamadda iga aqbasho codsigeeyga in aan iska dhaafo in aan nafteyda mattalo oo aan baddalo qareenka la talliya dadka naftooda mattala, gadaal ayaa loo dhigi karaa taariikhda la dhageyso dacwadda haddii uu codsado qareenka la talliya dadka naftooda difaaca. Kaddibna taariikhda la qaadi doono dacwadda waxaa laga dhigi doonaa taariikh ay ku heshiyaan qareenka xeer ilaalinta iyo qareenka eedeysanaha.

j. In the unlikely event that the Court orders advisory counsel to represent me after the trial has started and jeopardy has attached, the Court may grant a mistrial if requested by my new attorney and reset the trial date at a date mutually agreeable between counsel.

Haddii lala kulmo xaalad ay Maxkamadda ku ammarto qareenka la-tallinta in uu i mattalo kaddibna dacwadda bilaabato oo lala kulmo qalad, Maxkamadda waxay burin kaartaa qaadidda dacwadda haddii la codsado haddii uu codsado qareenkeyga cusub, kaddibna dib u dhigto qaadidda dacwadda ilaa taariikh ay ku heshiyaan qareenada.

k. I understand that if I am not a citizen of the United States, a plea of guilty or a finding of guilty for this crime may result in deportation, exclusion from admission to the United States or denial of naturalization as a United States citizen.

Aniga waxaan fahamsanahay in haddii aan ahayn muwaadin Mareykan ah, waanwaanta qirashada ama marka leygu helo in aan geystay dambigaan, taasii waxay dhallin kartaa dhoofin, reebid in aan soo galo Mareykanka ama in ley diido in aan qaato dhallashada muwaadinka Mareykanka.

18. That in view of the above, I wish to waive my right to be represented by an attorney and I wish to represent myself.

Kaddib marka la fiiriyo inta ku qoran kor, Aniga waxaan rabaa in aan iska dhaafo xaqa aan u leeyahay in uu i mattalo qareen iyo waxaan rabaa in aan mattalo nafteyda.

Dated this _____ day of _____, _____.

Taariikhda _____ maalinta _____, _____.

Petitioner
Codsadaha

(Added effective January 1, 1999; amended effective October 1, 2015.)
(Lagu darray laga bilaabo Janaayo 1, 1999.)